

Daad



NORTH DAKOTA
DEPARTMENT OF HEALTH
701.328.5166
701.328.5210

MACLUUMAAD

Daadka Kahor

Qashinka Guriga

Qashinka guriga, oo ay ku jiraan cuntada la qubay, waa in si adag loogu xidhaa kiish bac ah oo loo kaydiyaa si loo qubo marka xaaladdu saamaxdo. Musqulaha iyo qasabadaha waa in la isticmaalaa keliya haddii ay si quman u socdaan.

Xashiishka Khatarta Leh

Alaabta kahtarta leh sida waxyaabaha milma, rinjiga, batroolka iyo gaasta kale, sunta xayawaanka (sunta cayayaanka, haramaha iyo boqoshaaga, iwm.), bacriyaha, kiimikada guriga, saliidda, baatariyada aasidha-ledka, aasidha iyo milmayaasha (sida kuwa lagu sifeeyo bulaacadaha), alaabta merkuriga (guluubyada “fluorescent”, kul-sheegta, iwm.), qalabka guriga, iyo xataa waxyaabaha qarxa (sida rasaasta). Waxa wacan in laga saaro alaabtaas qolalka hoose ama dhismaha haddii daad la sii wariyo.

Haamaha Saliidda Guriga Kulaylisa

Waayo saliiddu waa ka fududahay biyaha, biyaha daadka ee soo gala qolalka hoose ee xidhan ee aad u hooseeya inay taabtaan haanta gaasta waxay keeni kartaa in haantu dheeldheelido, dhacdo iyo/ama sabayso biyaha dushooda haddii aanay haantu meel ku xidhnayn. Haddii haan aan xidhnayn ay dhaqaajiyeen biyaha daadku, khadkii ayaa kala go'aya oo qolalka hoose ayaa sumoobi kara. Haanta aan xidhnayn ee guriga dibadiisa waxay biyaha daadku u dhaqaajin karaan gidaarada dhismaha, ama waxay raaci karaan biyaha socda, ilaa guryaha kale.

Haddii biyaha daadku aad u kacaan oo haantu dul sabayso ama dhaqaaqdo:

1. La xidhiidh qaybiyaha saliidda ee jiiddaada si uu saliidda uga saaro haanta. In kasta oo ay tani hanta ku sabaysiin karto biyaha dushooda, waxay ay badbaadin

kartaa guriga inuu ku daato saliiddu marka biyuhu qubtaan iyo/ama hanta ka galaan meel daloosha.

2. Marka foornada/hanta gaasta aanay shaqaynayn, dahaadh albaabka haanta, gaasta iyo qasabadaha, iyo meelihii kale ee daloola si aanay biyuhu u gelin waxna uga soo bixin. Xusuusnow in dahaadhku ahaado mid aan biyo dhaafi karin. Haddii daloolka ama tuunbooyinku aanay dahaadhnayn, waa in ugu yaraan kor looga qaadaa meesha biyuhu gaadhai karaan.

3. Adkee oo xidh hanta si ay si toos ah u ahaato marka biyuhu sabaysiiyaan. (Xusus: Haantu waa sabayn

kartaa sidii xunbo haddii qolalka hoos ebiyo galaan. Wax kasta oo lagu adkeeyo haantu waa inay u adkaysan karaan xooga daadkaas.)

Haamaha Kaydka Ganacsiga Dhulka-hoostiisa

Inakasta oo batroolku ka fudud yahay biyaha, hanta dhulka hoostiisa ee la isticmaalayo ee buuxda lagama yaabo inay kor daadka u soo marto. Hase ahaatee, hanta madhan ayaa sabayn karta. Haamaha dhulka hoostooda, haddii aanay awada buuxin markaa daadku dhaco, waxa

laga yaabaa in biyuhu kor u soo qaaadaan oo dhaawac weyni gaadho. Talaabadaa ugu danbaysa, biyo ayaa lagu shubi karaa hanta si ay u buuxiyaan haddii aan batrool jirin. (Xusus: Biyaha haantaada ku jira kadib daadka waxa ka saari kara xirfadyahan u shaqeeya sharikadaha wax quba.)

Hubi meelaha furan ee haamaha in ay ka sareeyaan heerka biyaha daadku gaadhi karo.

Dammi korontada sida bamka, wareejisada, qaybisada, iyo qalabka xidha haamaha ee otomaatiga ah, iyo saacadaha sanduuqa damminta xaaladaha degdega ah, iwm. Fiiri heerarka gaasta ee haan kasta si aad ugu qiyaasto hadhow.

Marka haantaada dhulka hoostiisu aanay shaqaynayn, dahaadh daboolka meesha laga buuxiyo, daloolka furaha iyo meeshii kale ee dalooshaba ee hanta biyo ama ka soo geli karo ama batrool ka bixi karo. Xusuuso in dahaadhku ahaado mid aan biyo mari karin.



Daadka Kadib

Qashinka Khatarta Leh

Haddii alaab khatar leh aan laga saarin guriga kahor daadka, waa in la sameeyo baadhitaan si loo hubiyo in aanay soo bixin ama weelka wax gaadhin. Haddii alaab guriga u dhaw halis leedahay, milkiilaha guriga ama isuduwayaasha xaaladda degdega ah waa inay xidhaan jiidda guriga ilaa shaqaalaha xaaladda degdega ay nadiifinayaan buqcad.

Fiiri in qubitaan ama weelku dhaawacmay:

- Alaabta nadiifinta (nadiifinta moofada, bulaacadda iyo musqusha).
- Alaabta doogga iyo beerta (haramaynta, sunta-cayayaanka, sunta-jiirka).
- Alaabta baabuurta (saliid; antifreeze; baatariyo; taraansmishan, faren iyo dareeraha kiciyaha).
- Qalabka rinijiga/dukaanka-shaqada (dhejisada, xabagta, rinji, dhamaystire, khafiifiye, bac-dhejinta).
- Waxyaabaha gubta (haamaha brobaynta, gaasta kulaylisada, dhiisalta, gaasta/iskudarka saliidaha).
- Alaabta kale (baatariyada, gulsheegta iyo qiyaastada merkoriga leh).

Haddii aad haysato alaab aad ka walaacsan tahay, qaad tallaabooyinka soo socda:

- Ku rid weel kale oo ka sii ammaan badan, haddii ay suurogal tahay. Waxyaabaha daatay ku nuug “xashiishka bisadda” ka dibna ku rid bac ama weel kale oo adag.
- Magac ku qor weelka. Magacyada weelka cusub waa in lagu qoro macluumaadkan (a) waxa ku jira, (b) qofka weelka leh, iyo (c) xaalada waxa ku jira.
- Ha isku darin kiimikooyin ama walxo. (Ha isku darin rinji ah “latex” iyo rinji ku saleysan saliid. Waxaad rinji ah “latex” ku dari kartaa rinji kale oo isna ah “latex” sidoo kalena rinji ku saleysan saliid waxa aad ku dari kartaa rinji kale oo isna ku saleysan saliid.)

Ha isku darin qashin qudhmaha (sida qashin cunto, xashiishguri, maydka xayawaan yar) ama qashin khatar leh (aan firfircoonayn) alaab sida alaabta duminta, dhar, wiciyad iyo alaab waaweyn. Qashinka aan noolayn gooni u qub. Qashinka qudhmaha waa in lagu guro baco oo lagu adkeeyo qasaca qashinka si sahlaanan loo maarayn karo. Maarayntu waxay dhawraysaa bixitaanka qashinka ee cimilada iyo baylahda noolaha (cayayaanka jirre-qaadaha, jiirka, iwm.).

Baylahinta waxyaabo la isticmaali karo marka duminta dhismaha waxay keeni kartaa in lagu maareeyo qashinka wax khatar leh oo kale. Alaabta la isticmaalayo waa in si hufan loo magacaabo, lagu rido meel adag oo laga takooro qashinka si hadho lo isticmaali karo. Haddii alaabta dibedda la dhigo, ku wareeji ciid ama burciid si salka looga dhawro inay saamayn ka soo gaadho biyaha iyo.

Haddii bulshadaadu ay sugtay buqcad lagu qubo qashinka guriga ee khatarta leh, la xidhiidh saraakiisha degaanka si ay kuu hagaan.

Haddii barnaamij ururineed jiro, qashinkan waxa lagu qubi karaa meel ay dawladda hoose cayintay oo fashaa. Ha qubin hakuna daadin bulaacaddan qashinka ama hanta bulaacadda. Saliidda la isticmaalay, dareeraha taraansmishanka waxa la geyn karaa kaalinta batroolka ama meel lagu ururiyo qubiteenkeeda.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan takahluska qashinka kahor iyo kadib daadka fiiri *Guideline 1 – Emergency Waste Management and Disposal* oo laga heli karo www.ndhealth.gov/wm/Publications.

Xoolaha Nool

Waaxda Caafimaadka North Dakota waxay la shaqayn doontaa xoolo dhaqatada si si-hufan loogu sugo qubitaanka maydka xoolaha iyo waxyaabaha la xidhiidha si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelan karto caafimaadka dadka iyo xoolaha iyo ilaha biyaha.

Xaaladaha caadiga ah, waxdu waxay doorataa in xoolaha dhintay ay maareeyaan dib-u-habeeyayaashu ama lagu qubo meelha dawladda hoose u cayintay. Liistada meelahaas waxa laga heli karaa www.ndhealth.gov/wm ama wac Qaybta Maaraynta Qashinka ee Waaxda.

Xaaladaha degdega ah qaarkood, gaadiidka meelaha loo cayimay qashinka waa adkaadaan ama waa halis in cudur ka dilaaco. Markaas oo kale, waaxda ayaa sheegi xaalada ka duwan sidaas. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri *Guideline 14 – Emergency Waste Disposal Variance Notification: Dead Or Diseased Livestock*. Xaashidan iyo foomka “Emergency Waste Disposal Variance Notification” waxa laga heli karaa www.ndhealth.gov/wm/Publications.

Gargaar

Haddii aad su’aalo qabto ama u baahan tahay gargaar, wac laanta caafimaadka dadweynaha ee jiiddaada ama Waaxda Caafimaadka ee North Dakota: Maamulka Qashinka – 701.328.5166
Tayada Biyaha – 701.328.5210